



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 6aad
Taariikhda: Nov 03, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:12 AM	Saacadda uu Xirmay: 11: 55 AM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde)	Guntanka Kulanka: 31 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS Mudane Xasan Macalin 2. Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisinta XFS Mudane Cali Yuusuf Cali (Xoosh)	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhriinta Ayadaha Qur'aanka. 2. Ansaxinta ajendaha. 3. Akhrinta 3aad ee Hindise sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha. 4. Akhrinta 3aad ee Hindise sharciyeedka Kaalma- sharciyeedka Federaalka.

Furitaanka Kulanka:

Senator Saciid Cabdi Xuseen Cawke ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi

(Timacadde) ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 30 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde), ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta Aqalka Sare, Senator Deeqa Xasan Xuseen, si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta akhirinta 3aad Hindise sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 29 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: 1 Senator

Intaas kaddib, Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka ayaa u yeeray Xubin ka tirsan Guddiga Garsoorka, Cadaalada, Arrimaha Diinta iyo Xuquuqul Insaanka Aqalka Sare Senator Saciid Cabdi Xuseen Cawke si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhirinta 3^{aad} ee Hindise sharciyeedka Kaalma-sharciyeedka Federaalka. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise sharciyeedka Kaalma-sharciyeedka Federaalka., waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: 2 Senator

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Wasiirka Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta iyo Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS ayaa senatarada uga mahadceliyey ansixinta Hindise sharciyeedyadaan.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise sharciyeedka Barakacayaasha Gudaha.
3. Ansixinta Hindise sharciyeedka Kaalma-sharciyeedka Federaalka.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare Senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde) ayaa kulanka soo xiray saacada markay ahayd **11:55AM**.

DHAMAAD